



## **Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)**

**WARSAXAAFADEED 06/2012**

### **Ergeyga Gaarka ah Mahiga oo cambaareeyay weerarkii ismiidaaminta ahaa ee Muqdisho**

Muqdisho, 15 Maarso 2012 – Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Soomaaliya, Dr. Augustine Mahiga, ayaa sida ugu kulul u cambaareeyay weerarkii ismiidaaminta ahaa ee shalay lagu soo qaaday irrida laga soo galo Villa Soomaaliya, Muqdisho, oo ah xarunta Dowladda Federaalka KMG.

“Waxaan tacsii tiiraanyo leh u dirayaa qoysaska dadkii ku dhintay weerarka, kuwii ku dhaawacmayna waxaan u rajeynayaa caafimaad iyo soo kabasho degdeg ah”, ayii yiri Mahiga. Isagoo og is Al-Shabab ay sheegteen mas’uuliyadda weerarka, Ergeyga Gaarka ah wuxuu ugu baaqay “mucaaradka hubaysan inay si degdeg ah u joojiyaan weerarrada dhibaataada iyo rafaadka joogtada ah ku haya dadka rayidka ah iyadoo marna aan loo fiirsanin qiimaha nolosha baniaadanka.”

Biliihi u dambeeyay, dadweynaha reer Muqdisho waxay billaabeen inay arkaan faa’iidada amaanka iyo xasilloonida waxayna iyaguba kaalin muhim ah ka qaateen soo sheegidda waxyaabaha qarxa iyo joojinta iskudayga falalka argagaxisada. Ergeyga Gaarka ah wuxuu ugu baaqay inay sii wadaan heerka sare ee feejignaanta wuxuuna ku ballanqaaday in “falalkan argagaxisnimada ah aan weecinaynin geeddi socodka nabadda.”

Ergeyga Gaarka ah mahiga wuxuu sidoo kale ugu baaqay Dowladda Federaalka KMG inay kaalmo siiso dadka ku waxyeelloobay falalka argagaxida wuxuuna ku nuuxnuuxsaday inay muhim tahay in la xoojiyo Ciidamada Amniga Qaranka Soomaaliyeed. “Qaramada Midoobay waxay diyaar la tahay inay sii waddo taageerada ay fidiso Dowladda Federaalka KMG si ay u gaarto nabad, xasillooni iyo dibuheshiisiin qaran,” ayuu yiri.

---

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Nick Birnback, Xafiiska Isgaarsiinta Guud, Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (Nairobi, Kenya)

Tel: +254 20 762 6898 / 6805 or +254739976888

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website):

[www.unpos.unmission.org](http://www.unpos.unmission.org)